


Waa maxay soo gelista Uumigu?

GURYAHA DEGAANKA AH

Kiimikada dhulka ku bilqada ama lagu daadiyay ayaa waxay wasakhayn karaan ciidda io biyaha dhulka hoostiisa ku jira. Isku-dhafka Kiimikooyinka Dabiiciga ah ee Sida Fudud Hawada u Raaca (VOCs) waa kiimikooyin si fudud hawada ugu baxa.

VOCs waxay uumi ahaan uga soo baxa carrada wasakhaysan iyo biyaha dhulka hoostiisa ku jira waxayna u soo bixi karaan dhulka dushiisa. Haddii uumigani dhaqdhaqaaqo oo uu taabto dhismaha guriga, waxay ka soo gali karaan dildilaaca seeska, hareeraha tuubooyinka, ama iyaga oo soo maraya tuubada fatahaada ilaalisa (sump) ama tuubooyinka bullaacadaha. VOCs ayaa markaa wasakhayn kara hawada gudaha. Nidaamkan - marka wasakhdu ka soo baxdo meelaha hawadu ka jirto ee carrada dhexdeeda una gudubto hawada gudaha guriga - waxaa lagu magacaabaa soo gelitaanka uumiga.

VOC-ga inta ugu badan la helo inta lagu jiro baaritaanada soo gelitaanka uumiga ee Minnesota waa warshadaynta garaaso nadiifiyaha trichlorethylene (TCE), dareeraha nadiifinta qalalan ee tetrachlorethylene (perchlorethylene, PCE), iyo qaybaha ka mid ah batroolka. Tusaalooyinka guryaha/hantida noqon kara ilaha ay ka yimaadaan VOC-yadani waa warshadaha sameeya, nadiifiyeyaasha qalalan, iyo goobaha sameeya dahaadhka biraha.



Waa maxay ujeedada baaritaanka soo gelista Uumigu?

Dhismayaasha ayaa waxaa laga baaraa in uumi uu soo galo si loo go'aamiyo haddii ay jirto khatarta soo gelitaanka kiimikada uumiga ama in ay jirto walaac caafimaad oo suurtagal ah. Si uu walaac caafimaad u jiro, uumiga wasakhaysan waa inuu raaco hawada gudaha dhismaha oo uu yahay heerar walaac leh IYO in ay dadku ku neefsadaan hawada gudaha ee wasakhaysan wakhti muddo ah. Khataraha caafimaad ee ka imanaysa soo geliraanka uumiga ayaa inta badan ah mid hooseeya, laakiin waxaa muhiim ah in la qaado tallaabooyin lagu dhimayo ama meesha looga saarayo soo gelitaanka uumiga marka ay suurtagal tahay.

Maxaa dhacaya haddii laga shakisanyahay soo gelista uumiga?

Baaritaan dhulka hoose ee gurigaaga ee soo gelitaanka uumiga laga baarayo waxaa loo yaqaanaa muunad ka qaaditaanka muunad ka qaaditaanka sagxada hoosteeda waxayna ku lug leedahay qodida godadka yar yar ee dabaqaaga hoose laga qodayo si aad muunada uumiga looga soo qaado dhismaha hoostiisa.

Soo gelitaanka uumiga waxaa lagu baaraa iyadoo laga soo uruurinayo muunado deegaanka si loo raadiyo kiimikooyinka iyo cadadka jira.

Haddii kiimikooyinku ay ku jiraan dhismayaasha agtooda, waxa laga yaabaa inay lagama maarmaan noqoto in laga soo ururiyo muunado uumiga ciidda ka hooseeya dhismaha. Muunada hawada gudaha guriga ayaa sidoo kale la soo qaadi karaa. Muunada waxaa lagu soo ururiyaa qasacado gaar ah oo halkan lagu muujiyey.



Radon ku jirta gudaha Guryaha

Radon ayaa sidoo kale waxay ka soo gashaa dhismayaasha ciidda. Radon waa gaas aan ur lahayn, shucaac ah oo si dabiici ah ugu dhex jirta carrada. Radon waa sababta koowaad ee keenta kansarka sanbabada ee ku dhaca dadka aan sigaarka cabbinn. Minnesota gudaheeda, qiyaastii 40% guryaha ayaa waxay leeyihiin heerar radon ah oo keeni karta khatar caafimaad oo weyn. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo websaydka Waaxda Caafimaadka Minnesota (MDH) - Radon ku jirta gudaha guryaha mn.gov/radon

XIRMADA BAARITAANKA RADON EE BILAASHKA AH! Haddii aad ku jirto ama ka agdhowdahay aagga laga baarayo soo gelitaanka uumiga, isticmaal macluumaadka xiriirka MDH ee hoose si aad ula xiriirto MDH si aad u codsato xirmada baaritaanka radon ee BILAASH ah.

Maxaa la sameeyaa si loo yareeyo soo gaarista uumiga iyo hagaajinta tayada hawada gudaha?

Haddii uumiga carrada ee ku jira gurigaaga hoostiisa la ogaado in ay yihiin heerar muujinaya walaac, Hay'adda Xakamaynta Wasakhowga ee Minnesota (MPCA) ama Cidda Mas'uulka ah ayaa ku deeqi doonta in lagu rakibo nidaamka yaraynta soo gelitaanka uumiga si uumigaas hawada dibadda loogu sii daayo. Nidaamkani waxa uu ka hortagayaa uumiga dhulka hoostiisa ku jira ee waxyeelada leh in uuna soo galin dhismaha waxayna la mid yihiin kuwa loo isticmaalo in radon ayna soo galin guryaha. Nidaamyada yaraynta soo gaaristaanka uumigu waa wax sahlan, la isku halayn karo, oo la xaqiijiyay inuu waxtar leeyahay.

Biyaha aan cabbo miyey saamaysay?

Soo gaarista uumiga ayaa inta badan lala xiriiriyaa wasakhowga biyaha dhow ee dhulka hoostiisa ku jira ama ciidda. Biyaha la cabbo ee dawladda hoose waxay inta badan ka yimaadaan ceelal qoto dheer ama biyaha dusha sare ee dhulka waxaana si joogto ah looga baaraa wasakhda si loo hubiyo inay buuxiyeen shuruudaha. Haddii aad u isticmaasho ceel gaar loo leeyahay oo aad ka cabtaan biyaha oo hantidaada/dhulkaaga ay ku socoto baaritaanka soo gelitaanka uumiga, kala xiriir MDH wixii macluumaad dheeraad ah.

Wixii su'aalo ama macluumaad ah


Wixii ku saabsan baaritaannada goobta, muunad qaadista, hababka yaraynta soo gaarista

Kala soo xiriir MPCA taleefoonka 651-757-2040 ama email vaporinfo.pca@state.mn.us.

[MPCA Maaraynta soo galitaanka uumiga](https://www.pca.state.mn.us/air-water-land-climate/managing-vapor-intrusion)
(<https://www.pca.state.mn.us/air-water-land-climate/managing-vapor-intrusion>)

Wax ku saabsan soo gelitaanka uumiga iyo caafimaadka, radon, biyaha la cabbo
Kala xiriir MDH taleefoonka 651-201-4897 ama email health.hazard@state.mn.us.

[Soo Gelitaanka Uumiga MDH](https://www.health.state.mn.us/communities/environment/hazardous/topics/vaporintrusion.html)
(<https://www.health.state.mn.us/communities/environment/hazardous/topics/vaporintrusion.html>)



Nidaamyada yaraynta so gelitaankauumiga ayaa waxay u shaqeeyaan iyagoo abuuraya cadaadis xannibaad ah oo ka hortagaya soo gelitaanka uumiga.

Waxaa la diyaariyay iyadoo lala kaashanayo Hay'ada Maraykanka ee Diiwaanka Walxaha Sunta ah iyo Cudurrada Degaanka Si aad macluumaadkan ugu hesho qaab kale, soo wac 651-201-4897.